# Sugnaanta Cuntada & Nafaqada

FSNAU
Food Security and Nutrition Analysis Unit - Somalia

La Soo Saaray 20-ka Bisha 7aad ee 2011

**Warbixin Afar biloodle Kooban Saddex - oo ku saabsan Odoroska xaaladda Xilliga Gu'ga**

Cimilada
Suuqyada
Nafaqada
Beeraha
Xoolaha
Colaada Sokeeye
Arrimaha Gobolka ee Soo Shaacbax-aya
Iskudhafka Falanqayn-ta Sugnaanta Cunnada

**FSNAU - Somalia**
United Nations Somalia, Ngecha Road Campus
Box 1230, Village Market, Nairobi, Kenya
Tel: +254-20-4000500
Cell: +254-722-202146 / 733-616881
Fax: +254-20-4000555
Email: info@fsnau.org
Website: www.fsnau.org

## ARRIMAHA XAASAASIGA AH

Inkastoo ayna suurtagal ahayn in la helo natiijada qiimeynta ee xilliga Gu'ga ka danbeysa illaa laga gaaro bisha sideedaa (Agoosto) 2011, Waxaa cad in isugeynta tirada dadka u baahan gargaar bani'aadminimo ay kordhayso inta lagu guda jiro qaybta labaad ama dambe ee sannadkan. Arrimaha ugu muhiimsan ee sababaya ka sii daridda xaaladda sugnaanta cuntada waxaa ka mid ah liidashada wax-soo-saarka beerah ee xilliga Gu'ga ; hoos u dhaca hantida dhaqaaleed (xoolaha, keydka badarka) intii lagu jirey xilli-abaareedkii dheeraa ee Jilaalka; qiima bararka joogtada ah ee firileyda (badarka) taasoo ay sabab u tahay filashada hoos u dhaca ku imanaya imaantinka ama oolimaadka badarka suuqyada; kor u kaca nolosha iyo hoos u dhaca awoodda wax gadashada ama iibsiga, iskaalmeynta oo yaraatay baahida badatay awgeed; nabad galyo darada iyo colaadda sokeeye ee sii socda sababayna barakac iyo helid la'aanta gargaarka bani'aadminimo.


Sara u -kaca ku yimid qiimaha cuntooyinka daruuriga ah awgeed (galleyda, masagada) taas oo ay keentay xumaashaha xilli-roobaadkii Deyrta la soo dhaafay iyo gabaabsi degdeg ah oo ku yimid keydkii badarka waxay kor u qaaddey 35 boqolkiiba qiimaha nolosha ee deegaanada laga isticmaalo shilin Soomaaliga (Koofurta,bartamaha iyo waqooyiga) muddo hal sano ka hor ah. Arrinta kale ee saameynta ku yeelatay sare u kaca qiimaha nolosha waxay tahay qiimaha cuntada dalka loo iib keeno iyo shidaalka oo aad sare ugu kacay suuqyada gudaha, taasoo la socota sare u kaca qiimaha ee ka jira adduunka. Waxay u muuqataa in qiimaha cuntooyinku ay ahaanayaan kuwo sarreeya maadaama saadaashu ay muujineyso wax-soo-saarka ee xilliga Gu'gu ay noqonayaan kuwo ka hooseeya sidii caadiga ahaa taas oo keentay liidashada fursad u helidda ee qoysaska ku xidhan badeecadaha suuqa oo ay ka mid yihii qoysaska saboolka ah eek u sugan magaalooyinka iyo miyiga iyo dadka ku barokacay dalka gudihiisa kuwaas oo sugnaan doona xaalada adag illaa inta laga gaarayo bisha 12aad (Diisambar) ee sannadkan. Curashada roobabka Gu'gu waxay gacan ka geysteen yarenta dhibaatadii ka taagneyd biyaha iyo daaqa-taasoo aheyd saameyntii ugu weyneyd ee ka dhalatay xilliggii Jilaalkii daba dheeraaday muddo qiyaas ahaan dhan 9 bilood inta badan wadanka. Si kastoo ay ahaataba saameynta abaartii lasoo maray waxaa la filayaa in lasii dareemo dhawr xilli oo kale, gaar ahaan deegaanada ay ku nool yihiin reer-guuraaga xoolo-dhaqatada ah kuwaasoo laga soo sheegay in tiro badan oo xoolahooda ah ay ku waayeen intii lagu jirey abaarta. Haddana sidaasoo ay tahay, waqti xaadirkan dhibaatadu waxay aad u haysataa bulshada ku nool hab nololeedka beeraleydaee koofurta soomaaliya, kuwaasoo wajahaya xilligii labaad ee xumaanshaha ama bi'idda waxa-soo-saarka beeraha.

Xaaladda nafaqada waa mid walaac weyn leh, gaar ahaan **gobolada koofureed, halkaasoo daraasado deg-deg ah oo dhawaan la sameeyey ay muujisay xaalad nafaqo daro oo ba'an oo joogta ah ay ka jirto, iyadoo la saadaalinayo in deegaanada miyiga heerka nafaqo-xumidu uu ka sarreeyo boqolkiiba 20.** Waxa kale oo sii xaqiijiyey daraasad ay sam,eysay Hay'adda UNHCR oo sheegtay xaaladda nafaqo daradu ay tahay boqolkiiba ay tahay 33 ee xerada qaxootiga ee Doolow Caddo ee Ethiopia ee bishii 4aad (Abriil). Daraasaddu waxa kale oo ay muujineysaa sare u kac dhinaca dhimashada ah taasoo mar kale caddeyneysa dhibaatada ka jirta koofurta Soomaaliya.

**Arrimaha xaasaasiga ah iyo hor u digista inta u dhexeysa bilaha 7aad (Luulyo) illaa 12aad (Diseembar 2011)**

- ***Roobabka Gu'gu waxay yar kobciyeen hab nololeedka xoolo-dhaqatada ah inkastoo ay dhibaatadu weli kasii jirto taas oo lagu waayey hanta mug leh intii lagu jirey abaarta***

Roobabka Gu'gu waxay illaa heer ama xad hoos u dhigeen saameynta ay abaartu ku yeelatay bulshooyinka xoolo-dhaqatada ah maadaama ciriirigii ka taagnaa dhanka biyaha uu fududaaday ama hagaagay isla mar ahaantaana deegaanadii daaqsinkuna ay soo wanaagsanaadeen. Taasi waxay sababtey in qiimihii biyaha oo markii hore intii lagu guda jirey xilliga Jiilaalka gaarey meesha ugu sarreysa ay hoos u soo dhacaan ka dib markii biyo-dhaamintu hoos u dhacday halka hayaanka xooluhuna ay caadi ku soo noqoday. Sidaa awgeed, kharashkii xoolo-dhaqatada kaga bixi jiray biyaha iyo hayaaminta xoolaha ayaa si aad ah hoos ugu dhacay, inkastoo qosaska saboolka xoolo-dhaqatada ah uu wali culays ka haysto sicir-bararka ku yimi qiimaha ashcaarta ama cuntada maadaama ay hantidoodii hoos ugu dhacdey intii lagu guda jirey xilligii abaarta Jiilaalka. Waxaa intaa dheer, waxa la filanayaa in hoos u dhaca ku yimaado wax-soo-saarka xoolaha taasoo salka ku haysa daciifnimada jir ahaaneed iyo dhicinta badan ee ku timi xoolaha intii lagu guda jiray bilihii xilligii abaarta.




Taxano Xilliyeedka iyo Arrimaha Muhiimka ee Dhacay

Sidaa awgeed, xoola-dhaqatada saboolka ahi wax badan kama faa'iidi doonaan kor u kaca la filayo inuu ku yimaaddo qiimaha xoolaha inta lagu jiro xilliyada Ramadaanka iyo Xajka maadaama ay aad u yar tahay tirada xoolaha iib galka ahi. Kuwa ay sida aadka ah arrintani u taabaneysaa waa qoysaska xoolaleyda ah ee tiro badan oo xoolo ah ay ka baxeen xilligii Jiilaalka iyadoo meelaha qaarkood ay kordheen xoolo-dhaqatada cayroobey. Deegaamadan waxaa ka mid ah Deexda Waqooyiga iyo Bartamaha, hab nololeedka Sool ee Sanaag iyo qeybo ka mid ah Dooxada Nugaal, Xoola dhaqatada ku sugan Bakool iyo Hiiraan iyo hab nololeedka lo' dhaqatada ku dhaqan koofurta. Hab nololeedka xoolo-dhaqatada Hawd ee gobolada badhtamaha iyo Hiiraan iyo waliba qaybo ka tirsan deegaanada deexda ee Shabeelooyinka iyo Jubooyinka waxay ka mid yihiin xoolo dhaqatada ay aadka dhibtu u saameysay roob yaraanta awgeed, taas oo sii xumeynaysa ama kordhinaysa dhibta ka jirta hab nololeeyadan.

- ***Ifafaale muujinaya hoos u dhaca wax-soo-saarka beeraha ee xilliga Gu'ga taasoo ka sii dareysa xaaladda Gobolada Koofureed***

Wax-soo-saarka la filanayo in uu ka go'o Koofurta Soomaaliya waxay u muuqataa in uu noqonayo kala-bar intii caadi ahaan hore usoo bixi jirtey, taasoo ay keentay yaraanta roobabkii Gu'ga ee ka da'ay Soomaaliya iyo buuraleyda Ethiopia taas oo hoos u dhigtey heerka muga biyaha wabiyada,waxayna dib u dhac ku keentay hawlihii beerashada iyo hoos u dhac ku yimi wax-soo-saarka beeraha. Dhammaan deegaamada uu webiyadu maraan iyo beero xoolo dhaqataee Koofurta oo ka mid yihiin gobolada Shabeelada Hoose iyo Bay oo gugu dhexdhexaadka ah soo saar boqolkiiba 71 firileyda ka soo baxda koonfurta Soomaaliya. Saadaasha laga qabo dalagyadu way soo fiicnaan kareysaa gobolada Shabeelooyinka iyo Jubbooyinka haddii roobabka Xagaayada ee la filayo ( Juun ilaa Agosto) ay noqdaan kuwo dhexdhexaad ah ama fiican, taasina waxay goboladan u suurtagalineysaa inay helaan dalagyo usoo baxa waqti ka baxsan xilli-beereedka**.** Si kastaba ha ahaatee, gobolada Bakool, inta badan gobolka Gedo iyo Hiiraan ma jiraan ifafaale ama saadaal muujinaysa inay soo hagaageyso wax-soo-saarka beeraha ee xilliga Gu'ga. Sidaas darteed waxay u muuqataa inay dhibaatadu sii adkaaneyso Koofurta Soomaaliya, gaar ahaan qoysaska ku tiirsan hab nololeedyada ku tiirsan beer tabcashada taas oo ay ugu wacan tahay xilli labaadkii uu wax-soo-saarka hoos u dhaco iyo keyd laáan, arrintaasi waxay keenaysaa in uu dhakhligii iyo cuntadiiba ay ku yaraadaan qosaska beeraleyda ah, hoos u dhac fursadaha tacab goosiga, hoos u dhaca ku yimi is kaalmaynta taas oo ay weheliso laáanta gargaarka bani aadamanimo iyo colaadaha sokeeye ee sii kordhaya.

- ***Heerka nolosha oo sareeya wuxuu saameyn ku yeelanayaa bulshada ku tiirsan wax ka iibsashada suuqyada.***

Hoos u dhaca la filayo inuu ku yimaaddo suuq geynta firileydas iyo keyd laáanta waxay saameyn doontaa sare u kac joogto ah ee qiimaha cuntooyinka daruuriga ah ee dalka. Tan iyo billowgii sannadkan qiimaha cuntooyinka aasaasiga ah (masaggada iyo galleyda waxa uu kor u kacay boqolkiiba 52-95 inta badan suuqyada ama deegaanada laga isticmaalo Shilin Soomaaliga, halka ay laba jibaarmeen ama ay sadex jibbaarmeen meelaha qaarkood marka loo eego sannad ka hor. Qiimaha sareeya ee shidaalka ee suuqyada Soomaaliya, kaasoo la socda qiimaha shidaalka ee adduunka, ayaa qayb ka ah sicir-bararka waxayna saameyn kusii yeelan doontaa qiimaha cuntooyinka. Sidaa awgeed, heerka noloshu wuxuu sii ahaanayaa mid qaali ah taasoo wiiqeysa awoodda wax gadashada/iibsiga isla mar ahaantaana xaddideysa helitaanka cuntada ee bulshooyinka ku tiirsan iibsashada suuqyada, gaar ahaan bulshada magaalo ku noolka ah, barakacayaasha iyo reer miyiga saboolka ah. Xaaladdu waxay si gaar ah u sii baán tahay gobolada Koofurta-Bartamaha Soomaaliya halkaasoo xaaladda nabadgelyadu ay tahay mid aan sugneyn, oo ay weheliso xayiraado dhinaca ganacsiga iyo dhaqaalaha iyo yaraanta gargaarka bani'aadminimo. Sidaa awgeed tirooyin gaar ahaaneed oo ka mid ah dadweynaha ku dhaqan deegaanada aynu xusnay iyo kuwo ku nool qaybo ka mid ah waqooyiga Soomaaliya , kuwaasoo aan awoodaynin inay daboolaan baahidooda aasaasiga ah, sicir-bararka awgii, ayaa kusii jiri doona xaalad dhibooyin leh illaa dhammaadka sannadkan.


- ***Walaaca ku saabsan xaaladda nafaqada ee ka jira Koofurta iyo Bartamaha***

Meelo badan oo ka mid ah dalka, xaaladda nafaqadu waa mid walaac leh gaar ahaan gobolada Koofurta iyo Bartamaha halkaasoo la saadaalinayo in heerkeedu uu ka kor maro 20 boqolkiiba deegaanada miyiga. Sahan-daraasadeedyo ku saabsan nafaqada ayaa hadda ka socda deegaanada bartamaha iyo koofurta Soomaaliya kuwaasoo natiijadooda la filayo inay soo baxdo bartamaha bisha Luulyo 2011. Hay'adda FSNAU oo ay weheliso hayádda ACF ayaa si wadajir ah magaalada Muqdisho uga fuliyey bishii 4aad (Abriile) sahan-daraasadeed ku saabsan nafaqada waxayna natiijada sahankooda lagu ogaadey jiritaanka heer nafaqo-darro oo heerkiisu yahay 15.2 boqolkiiba iyo waliba nafaqo-xumo aad u daran oo heerkeedu yahay 1.7 boqolkiiba. Hoos u dhaca qiimaha lagu gato dalagyada la beerto ee ka jira magaalada ayaa laga yaabaa inay kaalin ka qaadato hoos u dhaca heerka nafaqo hadana natiiijada la helay waxay muujineysaa inuu heerku aad u sarreeyo. Sahan-daraasadeedyo kale ayaa laga fuliyey deegaanada ay ku sugan yihiin dadka gudaha dalka ku bara-kacay ee ku nool gobolada Waqooyi-galbeed waxaana natiijada daraasadda ku cad in xaaladda Hargeysa ay tahay mid deggan halka xaaladda magaalooyinka Burco iyo Berbera ay tahay mid aan fiicneyn xilliyada qaarkood.

# KOOBIDDA QAYBAHA


## CIMILADA

Khariidada 1aad : Qiyaasta Wadarta Roobabka (Maarso ilaa Maajo 2010)




Source: National Oceanic and Atmospheric Administration (NOAA)

Khariidada 2aad: NDVI 10ka maalmood ee ugu horeeya Juunyo 2011




Source: National Oceanic and Atmospheric Administration (NOAA)

Bilowshihii xilliga Gu'ga ee sannadkan 2011 dib ayuu u dhacay inta badan gobolada dalka. Guud ahaan xaaladda roobka ee Koofurtu waxay ahayd mid heerkeedu hooseeyo, halka ay meel dhexaad ama wanaagsanayd inta badan hab nololeedyada gobolada Bartamaha iyo Waqooyiga. Bartamihii bishii 4aad (Abriile) waxaa ka billowday meelo ka mid ah gobolada waqooyi iyo deegaano ka mid ah gobolada Bari, Sanaag iyo Bay roobab googoos ah oo shuux ah. Inta bada gobolada Soomaaliya waxay ku jireen roob laáan Ilaa laga soo gaaro tobankii maalmood ee ugu danbeysay bishii April inta badan gobolada kale waxay ahaayeen kuwo wali qallalan markaasoo ay roobab iska fiicani ay ka billowdeen inay ku hooraan inta badan Koofurta, iyo qeybo ka mid ah Waqooyi-galbeed. Markii lasoo gaarey labaatankii maalmood ee ugu horreysay bishii May waxaa isa soo taray xaddiga roobka iyo deegaanada uu ka da'ayo roobku taasoo saameynteeda laga dareemay dhamaan nolosha qoysaska Soomaaliyeed. Sidaasoo ay tahay, haddana ma jirin wax roobab ah oo dalka kusoo degdegay intii lagu jiray tobankii maalmood ee ugu danbeeyay bishii May iyo tobankii maalmood ee ugu horeeyay bisha Juun marka laga reebo goboalda Bari, W.Galbeed, Togdheer iyo Awdal.

Marka la eego dhanka Waqooyi, guud ahaan xaaladda di'itaanka roobku waxay ahayd mid u dhaxeysa meel dhexaad iyo heer wanaagsan marka laga reebo miyiga Guban iyo Waadiga Gebi iyo waliba meelo ka mid ah dooxada nugaal ( degmooyinka Garoowe,Eyl, iyo Ceel Afweyne ) iyo buuraleyda Sool(degmada Ceerigaabo), halkaasoo da'itaanka roobku uu ahaa mid ka hooseeya heerka caadiga ah. Marka aynu eegno Bartamaha, da'itaanka roobku wuxuu ahaa mid heerkiisu dhex-dhexaad yahay laakiinse waqti hore ayuu istaagay. Deegaanada uu ka da'ay roob aad u hooseeya waxaa ka mid ah Hawdka Galgaduud, Hiiraan iyo qeyb ka mid ah Mudug (Gaalkacayo). Haddeynu usoo noqonno Koofurta, inta badan goboladu waxay heleen roob heerkiisu dhexdhexaad yahay intii lagu jiray labaatankii maalmood ee ugu horreysay bishii May, laakiinse wixii intaa ka danbeeyey waxay ahayd roob la'aan. Dhanka gobolada Bay, Shabeelaha Dhexe iyo qayb ka mid ah Jubada Dhexe (Bu'ale iyo Jilib), xaaladda di'itaanka roobku waxay ahayd mid ilaa xad iska caadi ah marka la eego waqtiga, xaddiga iyo baaxadda deegaanka uu roobku ka da'ay meelkaha ay dhibaatada daran weli kasii jirto waxaa ka mid ah marinka xeebta ee gobolada Shabeelaha Hoose iyo Jubba iyo deegaanada nolo ahaan ka ag dhaw,dhamaan deegaanadan waxay ahaayeen kuwo qallalan (aan roob ka di'in) intii lagu jiray xilligii Gu'ga oo dhan (muuqaalka 1). Si kastaba ha ahaatee, deegaanadan waxaa weli laga sugayaa di'itaanka roobabka Xagaaga bisha Juun illaa billowga Agoosto.


Inta badan gobolada Soomaaliya waxaa soo fiicnaatay xaaladda khudaarta intii lagu jiray bishii May taasoo ay sabab u tahay bilaabashada xilliga qoyaanka. Arintan waxaa si hubaal ah u ogaadey Jaantuska Faraqa Caadiga ah ee Khudaarta (NDVI) (sawiro laga qaadat fogaan dhan 1 km) taasoo muujineysa in guud ahaan xaaladda Khudaarta ee dalku ay soo hagaageyso oo ay ka muuqato xoogganaan laga bilaabo bishii April ilaa tobankii maalmood ee ugu horeeyay bisha Juun. Haddana sidaasoo ay tahay xaaladdsa khudaartu waa mid liidata ( heer ku dhow heerarka ugu hooseeya ee NDVI) inta badan gobolka Gedo, qaybo ka mid ah gobolada Jubbooyinka ( Afmadow,saakow,deegaanada Shabeele iyo xeebta), gobolada Hiiraan iyo Galgaduud (Hawdka).

Sida ku cad Kulan Cilmiyeedkii 28aad ee ugu danbeeyay ee looga hadlayay arrimaha cimilada waddamada Geeska Afrika (kaasoo ka dhacay Nairobi intii u dhaxaysay 16kii ilaa 17kii bisha Juun) mudada u dhaxaysa luulyo ilaa Septembar ee sannadkan 2011 Waqooyi Galbeed (qeybo ka mid ah gobolka Awdal )waxaa la saadaalinayaa suurtagalnimada xaalad roobaad ku dhaw heer caadi ah ilaa heer ka sarreeya heerka caadiga ah ee di'itaanka roobka , inta soo hartey waxaa la saadaalinayaa inay qallayl ahaadaan inta lagu jiro mudadan.

## DAGAALLADA SOKEEYE

Intii lagu jirey sannadkan qeybo ka mid ah Koofurta iyo Bartamaha Soomaaliya waxaa halkoodii ka sii socday dagaalo goos-goos ah oo soo noq-noqanayay oo u dhexeeya dawladda, taageerayaasheeda iyo kooxaha mucaaradka ee hubeysan. Muqdisho, Jubbada hoose (Dhoobley), gobolada Gedo, Hiiraan (Beledweyne) iyo Galgaduud waxaa halkoodii kasii socday dagaallo u dhexeeeya dhinacyada dagaalamaya (Dawladda Federaalka KMG iyo kooxaha mucaaradka). Sidaa si ka duwan, xaaladaha nabadgelyo ee Waqooyigu guud ahaan ayaa ahaa kuwo deggan. Xiisado colaadeed oo u dhexeeya qabaaílada ayaa laga soo sheegay qeybo ka mid ah gobolka Nugaal iyo deegaanka Kalshaale ee degmada Buuhoodle, sidaasoo ay tahay haddana xaaladda nabadgelyadu waxay ahayd mid xasilloon.

**Jaantus 1: Joogitaanka Shaqaalaha Gargaarka Caalamiga ee Soomaaliya**




Natiijooyinka xaaladaha nabadgelyo ee gebi-dhacleyneysa deegaamada Koofurta iyo Bartamaha dalka ayaa isugu jira khasaare nafeed, barakac ku yimid dadweynaha, burbur hantiyeed, khalkhal ku yimaadda hawlihii ganacsiga iyo dhaqaalaha, xayiraad lasoo daristay isu socodka xoolo dhaqatada iyo gargaarka bani'aadminimo oo aad u yar. Suuqa Bakaaraha oo ah suuqa ugu muhiimsan ee badeecadaha looga qaado Koofurta-Bartamaha Soomaaliya, gobolka Waqooyi-Bari ee Kenya iyo Gobolka Soomaalida Itoobiya ayaa ah mid ay shaqadiisu hakatay nabadgelyo la'aan darted taasoo kor usii qaadeysa sicir-bararka badeecadaha gaar ahaan deegaanada koofurta Soomaaliya. Waxaa intaa dheer in xasaradahani ay yihiin sababta ugu muhiimsan ee keenta barakaca dadweynaha gudaha iyo mida dibaddaba. sida lagu muujiyay Barnaamijka la socodka Dhaq-dhaqaaqa iyo barakaca dadka ee hay'adda qaramada midoobay u qaabilsan arrimaha qaxootiga (UNHCR) sannadkan gudihiisa dagaalada socda awgood in ka badan 200,000 oo qof ayaa ku bara kacay gudaha Soomaaliya ayadoo tiro kale oo gaaraysa 70,000 oo qof ay u qaxeen dhanka waddamada deriska ah. Dadkan bara-kacay ayaa badankoodu waxay kasoo jeedaan deegaanada Koofurta iyo Bartamaha Soomaaliya. Bishii 6-xaad ee 2011 oo kaliya tiro le'eg 14,900 ayaa ku barakacday dalka gudihiisa taasoo ay sababtay dagaalada Soomaaliya, in ka badan kala bar dadkan ayaa waxay ka soo qaxeen magaalada Muqdisho. Hase ahaatee, sannadkani waxaa kale oo uu ku tilmaannaa bara-kac ay sababeen abaaruha dalka ka dhacay iyadoo kumanaan oo qof ay gudaha iyo dibaddaba u bara-kaceen.

Hawlgalada gargaarka bani'aadminimo inta badan gobollada koofureed (Muqdisho: Beled Xaawo, Luuq, Ceel Waaq oo ka mid ah gobolka Gedo,Dhobley oo ka tirsan Jubbada hoose), ayaa weli xayiran, taasoo ay markhaati u tahay hoos u dhaca heerka joogitaanka hay'adaha qaramada midoobay (UN) iyo shaqaalaha caalamiga ah ee u shaqeeya hay'adaha aan dowliga aheyn (eeg jaantuska 1). Sidaasoo ay tahay haddana, warbixinta (bish 6-aad) arrimaha gargaarka bani'aadminimo ee xafiiska qaramada midoobay u qaabilsan isku dubaridka hawlaha bani'aadminimada (OCHA) ee Soomaaliya waxaa ku muujisan in helitaanka gargaarka bani'aadminimo ee qaybo badan oo ka mid ah bartamaha Soomaaliya (Caabudwaaq, Xeraale, Balamballe, Dhuusamareeb, Guriceel oo ka tirsan Galgaduud iyo Matabaan oo Hiiraan ka tirsan) uu soo hagaagayo laga soo billaabo horraantii sanakan 2011, taasoo ka tarjumeysa jiritaanka fursado dheeraad ah oo lagu gaarsiinayo gargaarka bani'aadminimo dadka tabaaleysan..

Gunaanadkii,dagaallada goos-gooska ah oo sii socda ayaa waxa sii raad xumo ku yeelan doonaan isu socodka badeecadaha ee dalka gudihiisa, ayadoo sidoo kalena ay saameyneyn doonaan qiimaha badeecadaha, isla mar ahaantaana xayiri doonaan isu-socodka dadka iyo xoolaha, waxayna xaddidi doonaan fursadaha shaqada.

## BEERAHA



*Bixitaanka Dalaga oo Liita. Jalalaqsi , Hiiraan. FSNAU, May 2011*

Hawlihii beeraha ee koofurta Soomaaliya waxoogaa ayey dib u dhaceen- bartamaha bisha 4aad (Abriile), ka dib markii xilligii Gu'ga uu dib uga dhacay waqtigiisii caadiga ahaa 2011 taasoo ay weheliso roobabkii Gu'ga oo ka yaraadey heerkii caadi ahaan loo bartey. Muddo lagu jiray roob la'aan (15 ilaa 20 maalmood ) laga soo bilaabo usbuucii ugu dambeeyey bishii 4aad (Abriile) ayaa sababtay in dalagyadii abuurku ay biyo la'aan la qalalaan taasoo saameyn ku yeelatay fursad helidda tacab goosiga (sii beerashada, harameynta iyo waraabinta) ee inta badan deegaanada beeraleyda ee dalka. Haddaba roobabkii da'ay bartamihii bisha 5aad (Maajo) 2011 ayaa waxoogaa soo hagaajiyey xaaladda dalagyada la beertay taasoo keentay in hawlihii beerashada dib loo bilaabo inta badan deegaanada beeraleyda. Awoodda waraabineed ee deegaanada wabiyadu waxay ahayd mid ka hooseysa heerka caadiga ah sababtoo ah heerka biyaha wabiyada Jubba iyo Shabeelle oo ah mid hooseysa tani waxay salka ku haysaa hoos u dhaca muggaa roobabka ka da'ay Soomaaliya iyo Buuraleyda Itoobiya. Arrin kale oo muhiim ah ayaa waxay tahay in awood falashada beeraha iyo isticmaalka qalabka beeraha ayaa hoos u dhacday intii lagu jiray xilliga beerashada ee Gu'ga 2011, tani waxay salka ku haysaa sicir-bararka ku yimid qiimaha shidaalka iyo abuurka dalagyada oo gabaabsi noqday kadib markii uu baáy wax-soo-aarkii xilligii *Deyrta ee 2011*. Natiijadeedu waxay noqotay in heerka falashadu ee beer biyoodka iyo roobka uu hoos uga dhaco heerkii dhex-dhexaadka ahaa .

Deegaanada ay ka jirto liidashada bixitaanka beeraha (biqil, koritaanka dalaga, ubaxeynta ,iyo bacriminta) waxaa ka mid ah gobolada Hiiraan, Jubada Hoose, Shabeelada Hoose, Bakool, Gedo iyo qeybo ka mid ah Jubbada Dhexe (Saakow iyo Salagle). Dhanka kale Gobolka Bay, Dooxada Digir ku baxa, Shabeelaha Dhexe, qaybo ka mid ah Jubbada Dhexe (Bu'aale iyo Jilib) , Togdheer iyo Waqooyi Galbeed ayaa bixitaanka dalagyadu yihiin mid aan wanaagsaneyn. Gobolka Awdal ee hab nololeedka beero-xoolo dhaqatada ee Waqooyi Galbeed waxaa laga soo sheegayaa in xaaladda dalagu yahay mid ku dhaw dhexdhexaad. Saadaasha laga bixinayo xaaladda dalagyada abuurka ee inta badan gobolada Jubba (Bu'aale,Jilib,Jamaame,Kismaayo) iyo Shabeelle ayaa ah mid wanaagsan haddii roobabka *Xagaayada* ee la filayo (bisha Juun ilaa horaanta Agosto) ay u da'aan si heer dhex-dhexaad ah ama ka sii fiican.




*Xaaladda Dalagga Masaggada oo ah Dhexdhexaad. Tuulada Goorasane, Baydhabo, Bay. FSNAU, May 2011.*

Sidoo kale, *roobabka Karanta* (oo sida caadiga ah da'da aakhirka Luulyo ilaa bisha 9aad ) waxay faa'iido u lahaan doontaa masaggada ku baxda mudada dheer iyo galleyda huruuda ah ee mudada gaaban ku baxda kuwaasoo laga beerto deegaamada xoolo-dhaqato/beeraleyda ah ee Waqooyi Galbeed (Awdal,Togdheer iyo Waqooyi Galbeed). Tiiyo si wada jira ay FSNAU iyo hawl-wadaagayaasheeda qaban doonaan daraasad xilliyeedka Gu'ga inta u dhexeysa 4ta ilaa 23ka Luulyo 2011, ifafaalaha ama odorosku waxuu tilmaamayaa hoos u dhac ku imanaya wax-soo-saarka ee masaggada iyo galleyda ee koofurta marka la bar-bar dhigo siday xaaladdu ahayd isku celcelis ahaan 15kii sano ee ugu dambeysay.


Sicirka cuntada daruuriga ah(galley, masaggo) wuxuu sii ahaanayaa mid sareeya inta lagu jiro sanadkan maadaama hoos u dhici dalagyada soo baxay ee Deyrtii 2010 ay keentay hoos u dhaca dalagyada beeraha ee inta badan soomaaliya marka laga reebo Waqooyi-Galbeed (muuqaalka 2). Arrinta kale ee ku lugta leh qiimo kaca dalagyada la beerto waxay tahay degganaan la'aanta ku timid hawlaha ganacsiga iyo dhaqaalaha Koofurta-Bartamaha kuwaasoo u gudbay gobolada iyo xuduudahaba ee ay keeneen dagaaladu.. tusaale ahaan, qiimaha dhex-dhexaadka ah ee dalagyada beeraha ee muhiimka ah(galleyda iyo masaggada) wuxuu kordhay gobolada Soomaaliya oo dhan boqolkiiba 50-90 intii u dhaxeysay bishii Janaayo ilaa May 2011 marka laga reebo Waqooyi Galbeed. Heerka qiimaha guud ee dalagyadan waa mid sarreeya marka la bar-bar dhigo qiimihii uu ahaa bishan oo kale sannadkii hore. Gobolada Shabbeele iyo Jubba (siday u kala horreeyaan )oo ah kuwa ugu wax soosaarka badan dhinaca masaggada qiimaha dalaggana waa 111 boqolkiiba wuxuuna 80 boqolkiiba ka badan yahay intii uu ahaa sannad ka hor. Isla mudadaas sannadka ah gudaheeda isku celceliska qiimaha masaggada guduudan waxay kor u kacdey suuqyada deegaanada dalaggan aad looga beerto (132 %), gaar ahaan Bartamaha (79%), iyo Waqooyi bari (70%).

**Jaantus 2: Isbeddelada Qiimaha Firileyda ee Gobollada**




Dhanka Waqooyi Galbeed qiimaha masaggada cad wuxuu kor u kacay oo kaliya 13 boqolkiiba qiimihii uu taagnaa sannadkii hore taasoo ay sabab u tahay xilli beereedkii Guga iyo Karanta ee ugu danbeeyay oo uu dalaggu si fiican usoo go'ay. Fursadaha shaqada beerashada ee Gu'gan waa kuwo soo hagaagaya intii lagu jiray bishii ugu danbeysay (May 2011) taasoo ay sabab u tahay (sii socoshada hawlaha la xiriira abuuritaanka,harameynta iyo waraabinta). Laakiise qiimaha ay ku shaqeeyaan shaqaalaha beeruhu weli wuu ka hooseeyaa siduu ahaa sannadkii hore xilligan oo kale gobolada koofureed ee Shabeelle (20%), Jubba (22%) iyo aagga qaniga ku ah beerashada masaggada (8%) arrintani waa mid ka dhalatay hoos u dhaca ku yimid hawlaha beerashada iyo kororka dadka shaqo-doonka ah.. goboladan danbe heerka isdhaafsiga dalaggga iyo shaqada wuxuu taagan yahay heerkii ugu hooseeyey muddo sadex sano ah waxaana sabab u ah kor u kaca ku yimid qiimaha dalagyada la beerto. Sannadkii 2011, xaddiga is-dhaafsiga ganacsiga ee koofurta Soomaaliya wuxuu hoos ugu dhacay 38-45 boqolkiiba, gobolada Shabeelooyinka ayaana ah meesha ugu daran ee uu hoos u dhacaasi ka jiro. Marka la bar-bar dhigo sidii ay xaaladdu ahayd sannad ka hor (May 2010), xaddiga isdhaafsiga ganacsiga ee deegaanada hodanka ku ah beerashada masaggada wuxuu hoos ugu dhacay (55%), Jubba (60%), iyo Shabeelle (67%) sababtoo ah kor u kaca ku yimid qiimaha dalagyada la beerto iyo hoos u dhaca lacagta ay qaataan muruq-maalka ka shaqeeya beeraha (muuqaalka 3). Waqti xaadirkan (May 2011) deegaanada koofurta Soomaaliya heerka dhexdhexaadka ah ee qiimaha uu qaadanayo shaqaalaha ka shaqeynaya beerta muddo hal maalin ah waa 3 ilaa 5 kiilo halka ay ka hayad isla bishan oo kale sannadkii hore 9 ilaa 11 kiilo . Dhanka deegaanada Waqooyi Galbeed xaddiga is-dhaafsiga ganacsiga ee dalag shaqo ku badaslashada wuxuu ahaa mid qiimihiisu sugan yahay kaasoo waqti xaadirkan maraya 10kg. waxaa la saadaalinayaa in xaddiga cunto-shaqo ku badalasho uu aad hoos ugu sii dhaco maadaama la filayo in qiimaha dalagyadu ay sii kacayaan inta la sugayo soo gu'itaanka Gu'ga soo socda, sidoo kale waxaa la filayaa in qiimaha ay ku shaqeeyaan muruq-maalku uu hoos usii dhaco, iyo nabadgelyo xumo.

**Jaantus 3: Isbeddelada Iskubeddelashada Mushaar Maalmeedka iyo Firilayda ee Gobollada**



## XOOLAHA

***Daaqa, Biyaha iyo Xaaladda Xoolaha***

Roobabka Gu'ga waxay fududeeyeen ciriirigii ka jirey dhanka biyaha, gaar ahaan hab nololeedyada Sool, Hawd, Cadduun, Dooxada Nugaal iyo Deex gobolka Bari, kuwaas oo ahaa kuwo dhibaato biyo yaraan ahi haysatay kaddib markii la waayey roobabkii xilliiga Deyrta isla mar ahaantaana uu dheeraaday Xilliga Jiilaalka ee oomanaha ahaa. Hawlihii biyo-dhaamminta ayaa istaagay inta badan hab nololeedyada xoolo-dhaqato iyo beero-xoolo dhaqatada kadib markii ay curteen roobabkii Gu'ga oo biyeeyey weelashii biyaha (warihii, balliyadii iyo berkadihii)

Waxa la xaqiijiyey in uu kor u soo kacay heerka maaxda ee ceelasha dhaadheer ioy kuwa gaabanba ee gobolada waqooyi, qeybo ka mid ah gobolada koofurta iyo bartamaha..Guud ahaan korodhka biyaha waxay keentay hoos u dhac ku yimi qiimaha biyaha lagu gato inta badan deegaanada ay ku nool yihiin bulshooyinka xoola-dhaqatadu. Waxaa kaloo taa wehelisa in ilihii dhul daaqsimeedkii ay dib u soo magoolaan deegaanada Waqooyiga, Deexda, Dooxada Digirta lagu tacbo ee gobolada dhexe, Bay, , qaybta waqooyi ee gobolka Gedo, Shabeellaha Dhexe, iyo qaybo ka mid ah Jubba iyo hab nololeedka lo'dhaqatada ee Jubada Hoose. Si ka duwan sidaas deegaanada xoolo-dhaqatada ee diilka xeebta ee Koofurtu waa kuwo wali xaaladdu ay liidato maadaama uuna roobku di'in. Sidoo kale, xaaladda dhul daaqsimeedka iyo biyuhu waa kuwo meelo gooban laga heli karo hab nololeedka Golis/Guban ee dhinaca bari, qaybta koonfureed ee gobolka Gedo iyo hab nololeedka Guban ee Sanaag, roob yari goos goos ah awgeed.

Inta badan gobolada dalka waxaa si caadi ah ama caadi ku dhow dib usoo cusboonaaday isu socodkii xoolaha intii lagu jiray Gu'gan iyadoo xoolihii ka hayaamay dib ugu soo noqodeen deegaanadoodii. Sida lagu helayo warbixinnada, waxaa jira xoolo badan ka soo hayaamay waqooyi bari Kiiniya iyo koonfurta gobolka Gedo iyaga oo imanaya hab nololeedka xoolo dhaqatada ee dariska la ah ee Juba Hoose iyo hab nololeedka beero xoolo dhaqatada ee Bay taas oo heshay roob ka wanaagsan kooda; tani waxay keeni kartaa xaaluf deg-deg ah (biyo iyo baadba). Waxaa kale oo jirta, inay lagama maarmaan noqoneyso in xoolaha laga soo safriyo dhulka gudaha ah lana geeyo dhanka deegaanada webiyada haddii ay roobabka *Xagaayadu* yaraadaan ( Jubba, Shabeelle iyo qaybo ka mid ah Bay), taasina waxay xoolaha ku keeni doontaa khatar ah inuu ku dhaco cudurada qoyaan la deriska ah.

Deegaanada ugu muhiimsan ee xoola-dhaqatada ee Koofurta iyo waqooyiga iyo kuwa xoolo-dhaqato/beeraleyda ee koofurta waxaa laga soo sheegayaa dhimasho ku timid xoolaha intii lagu jiray xilligii Jiilaalka. Waxaase jirta, in muuqaalka jireed ee xoolihii kasoo badbaaday xilligii abaarta ee daba-dheeraaday ay billaabeen inay soo fiicnaadaan gaar ahaan ( idaha iyo riyaha), halka ay lo'da iyo geelu ay ka hooseeyaan heerkii caadiga ahaa deegaano badan. Xaaladda muuqaalka jireed iyo wax-soo-saarka xoolaha ee gobolka Awdal iyo Dooxada Nugaal godan(gobolka Sool) gobolada Waqooyi Galbeed waa mid heer dhexe ah dhammaan noocyada/meesiyada xoolaha. Dhinaca kale, qaybaha kale ee Soomaaliya, waxa la filayaa in uu aad u yar yahay wax-soo-saarka xoolaha iyo dhalintaankooda, gaar ahaan ariga (riyo iyo ido) iyo lo'da ilaa laga gaaro bisha 10aad (Oktoobar) 2011 iyo 2aad (Febraayo) 2012 siday u kala horreeyaan waayo rimayga xoolaha ayaa aad u yar taasoo ay sabab u tahay diifta soo gaartay xoolaha xilligii abaarta lagu jiray. Sida lagu soo warramayo, waxa intaa wehelisa inay ka jirto deegaano dhawr ah oo ka mid yihiin hab nololeedyada ugu muhiimsan xoolo-dhaqatada in geelu dhicinayo… Sidaa darteed dhalitaanka geelu waxay ahayd mid aad u hooseysa bishii 5aad (Maajo) inkastoo la filayo bilaha 6aad (Juunyo) iyo 7aad (Luulyo) gudahooda in waxoogaa ay geelu dhalaan taasoo qeyb ka qaadan doonta helidda caanaha.



*Xaaladda dhulka daaqsinka iyo biyaha oo soo hagaagaya. Karkaar Dharoor, gobolka Bari.FSNAU, May 2011*




*Xaaladda idaha iyo riyaha oo soo fiicnaanaya. Galbarwaaqo,Hobyo,gobolka Mudug, FSNAUMay 2011*




*Geel caato ah. Gaalkacyo, Gobolka Mudug, FSNAU, Maajo 2011*

**Jaantus 4: Isbeddelada Qiimaha Ariga Daabaxa ee Gobollada**



***Ka Ganacsiga iyo Qiimaha Xoolaha, iyo Is-dhaafsiga xoolaha iyo Badarka***

**Jaantus 5: Isbeddelada Isdhaafsiga Ariga Daabaxa iyo Firileyda ee Gobollada**




Qiimaha xooluhu waxay muujiyeen kor u kac bishii 5aad (Maajo) inta badan suuqyada dalka marka la bar-bar dhigo sidii ay xaaladdu ahayd bishii 12aad (Diseembar 2010) (Jaantus 4). Gobolada Waqooyi Galbeed, Waqooyi Bari iyo Bartamaha, qiimaha neefka ri'da dabaaxa ah wuxuu kor u kacay 27, 19 iyo 21 boqolkiiba waayo muuqaalka jirka ee xoolaha ayaa soo fiicnaaday intii lagu jiray Gu'gan taasoo keentay inuu suuqoodu fiicnaado. Qiimaha riyaha dabaaxa ah ee gobolada Shabeelooyinka iyo deegaanada caanka ku ah masagada waxay mujiyeen isbedel laáan inkastoo uu kor u kac weyni ku yimid deegaanada Jubboooyinka (34%) taasoo ay keentay xoolihii suuqa loo soo iibgeyn jiray oo yaraaday. Qiimaha lagu kala gato lo'da oo markii hore ahaa mid hooseeya taasoo ay keentay caqabad ka timid sidii xoolaha loo geyn lahaa suuqa magaalada Gaarisa intii lagu jiray xilligii abaarta ayaa mar kale si weyn kor ugu kacay bishii 5aad (Majo) (bishiiba kordhay boqolkiiba 31 % gobolada Jubbooyinka ). Si kasta oo ahaataba, qiimaha lo'du waxay ka hooseysaa qiimihii uu ahaa sannad ka hor ( hoos u dhac dhan 21 %) taas oo ay sababtaylo badan oo la keenay ama loo iib keenay suuqyada ka dib markii ay xidhantay suuqii Gaarisa abaarta awgeed, laguna bedelenayoido iyo riyo dhaqmaad ah. Si kastaba ha ahaatee waxaa la filayaa in qiimaha lo'du uu kor u kaco haddii roobka Xagaayadu uu si fiican u da'o. Shantii bilood ee ugu dambeysay heerka is-dhaafsiga ama isweydaarsiga riyaha dabaaxa ah iyo badarka (bariis) ee wuu kordhay gobolada dhexe (9%), Waqooyi bari (9%), iyo Togdheer (52%) kadib markii uu kor u kac ku yimid qiimaha riyaha dabaaxa ah , qiimaha bariiskuna uu noqday mid aan isbad-baddal sameyn (Jaantus 5). Haddana sidaasoo ay tahay, isdhaafsiga ganacsiga ee riyaha dabaaxa ah iyo badarka (galleyda cad/masaggada guduudan) hoos ayuu u dhacay Shabeelooyinka (45%), Jubbooyinka (17%) iyo deegaanada hodanka ku ah masaggada (35%) taasoo ka dhalatay kor u kac weyn oo ku yimid qiimaha firileyda la beerto ee goboladan.

Sida ku cad tirakoobyada laga helay maamulada dekadaha, xoolaha laga dhoofiyay dekadda Boosaaso bishii 5aad (Majo) 2011 (51,745 oo neef ) taasoo ka hooseysay boqolkiiba 13 marka la bar-bar dhigo tiradii la dhoofiyay bishii 5aad (Maajo) ee sannadkii hore. Isu-geynta tirada xoolaha ee la dhoofiyay isla dekadda Boosaaso intii u dhaxaysay bishii Janaayo ilaa Maajo ee 2011 waxay ka hooseeyaan 19 boqolkiiba tirada xoolaha ee laga dhoofiyey isla dekadda Boosaaso intii u dhaxaysay Janaayo ilaa Maajo ee sannadkii 2010. Hoos u dhaca ku yimid tirada xoolo dhoofinta wuxuu aad ugu badan yahay idaha, riyaha, iyo lo'da taasoo ay ku lug leedahay hoos u dhaca xoolaha suuqyada loo iib keenay muddadii abaarta. Waxaase jirta in intii lagu jiray isla muddadan waxaa kor u kac laga dareemay tirada dhoofinta geela laga dhoofiyay dekadda Boosaaso oo kor u kacay 7 boqolkiiba (Janaayo ilaa Maajo 2011) halka uu sannadkii hore ka ahaa boqolkiiba 2. Tani waa calaamad kale oo muujineysa dhibaato ka jirta iib keenka xoolaha oo haysata deegaanada xoolo-dhaqatada ee ay abaartu saameysay. Dhanka kale, tirada guud ee xoolaha laga dhoofiyay dekadda Berbera bishii Janaayo ilaa Maajo ee 2011 waxay ahayd 540,747 taasoo ka koreysa 14 boqolkiiba heerka tirada xoolihii la dhoofiyey intii u dhaxaysay bishii Janaayo ilaa Maajo ee sannadkii hore . arrintan waxaa kaalin weyn ku leh dhul baaxad leh oo xoolaha lagu xanaaneeyo oo ku yaal dekadda oo ay ku jiraan xoolaha ka yimaada Itoobiya, halka xoolaha Boosaaso laga dhoofiyo laga keeno intooda badan Soomaaliya marka laga soo billaabo billowgii sannadka, ma jirin hilib laga dhoofiyay magaalooyinka Muqdisho, Beletweyn, Gaalkacayo iyo kawaanka Burco.



## SUUQYADA IYO GANACSIGA

***Ifafaalaha Heerka Sarrifka***


Shilin Somaaligu waxoogaa ayuu hoos u dhacay tan iyo bishii janaayo 2011 ( 1-5 %) marka la bar-bar dhigo doollarka Mareykanka inta badan suuqyada Soomaaliya. Isla mudadan intii lagu jiray suuqyada Waqooyi Galbeed shilinka Somaliland hoos ayuu u dhacay (4-9 %). Haddii aan arrintan ku saleyno hab sannadeed waxaan ogaaneynaa in shilin soomaaligu uu hoos u dhacay qiyaas dhan 3-6 boqolkiiba, suuqyada Bakool, Shabeelooyinka, Hiiraan iyo Banaadir, gobolka Bay,Gedo iyo Gobolada dhexe xaaladda sarrifku wey degganayd, halka dhanka Waqooyi bari ay fiicnayd (2 %). Hase ahaatee, muddo haatan laga joogo sannad ( May 2010) heerka sicirka shilinka Soomaaliland aad ayuu kor ugu kacay inta badan suuqyada sababtoo ah xaaladda siyaasadeed oo deggan iyo kororka lacagta adag ee ee kasoo gasha xoolaha badan ee laga dhoofiyo dekadda Berbera

***Ifafaalaha Qiimaha Badeecadaha***

Intii lagu jiray sannadkan 2011 qiimaha lagu kala gato waxyaabaha daruuriga ah ee dibadda laga keeno ( shidaalka, bariiska guduudan, sonkorta, saliidda caddeyda iyo burka) waxaa ku yimid kor u kac. Laakiinse, heerka kor u kaca badeecooyinka mudadii u dhaxaysay Janaayo ilaa May 2011 wuxuu ahaa mid aan isku mid ahayn marka loo eego noocyada badeecooyinka iyo deegaanada. Kor u kaca ugu sarreeya waxaa laga dareemay gobolada Banaadir,Shabeele, iyo gobolada hodanka ku ah beerashada masaggada, kor u kacan waxaa si gaar ah looga dareemay shidaalka (22-43 %). Badeecada labaad ee deegaanada hodanka ku ah beerashada masaggada qiimahoodu ugu sarreeyo waa saliid caddeyda ( 33 %) . dhanka kale, isla muddadaas intii lagu jiray kor u kac dhanka qiimaha ah oo waxoogaa aan badneyn iyo mid heerkiisu uu caadi ah ayaa laga dareemay deegaanada laga isticmaalo shilin Soomaaliga kaasoo ku yimid bariiska (7-15 %) iyo sonkorta (5-14 %) taasoo ka duwan ifafaalaha adduunka oo muujinaya hoos u dhaca qiimaha bariiska iyo sonkorta ilaa iyo bishii diseembar 2010.si ka duwan sida kor ku xusan, kor u kaca ku yimid qiimaha burka (13-28%) waa mid daba-socota xaaladaha suuqyada adduunka kadib markii waddamada ( Mareykanka iyo Midowga Yurub iwm ) ay galeen xilli cimilo xun taasoo yareysay soosaarka dalagga. Sare u kaca dhawaan ku yimid qiimaha badeecooyinka dalka loo soo dhoofiyo waxaa keenay dhawr arrimood oo isugu jira kuwo dibadda ah iyo kuwo gudaha ah sida kala duwanaanta canshuuraha la qaado; qiimaha isgaarsiinta loo isticmaalo badeecadda oo ah mid qaali ah inta lagu jiro xilli roobaadka sababtoo ah shidaalka oo kor ukacaya iyo waddooyinka oo dhoobo ah; dagaalada kasoo cusboonaaday Muqdisho, hakadka ku yimid badeecooyinkii bakhaarada kaydka (Bakaaraha,Xamarweyne) kuwaasoo la geyn jiray gobolada dhexe iyo kuwa koofureed; iyo hoos u dhaca yar ee ku yimid shilin Soomaaliga. Qiimaha badeecooyinka dibadda laga soo dejiyo aad ayuu sare ugu kacay suuqyada laga isticmaalo shilin Soomaaliga ( hoos u dhac heerkiisu yahay 31% ayaa ku yimid sicirka cuntada

iyadoo sidoo kale uu hoos u dhac heerkiisu yahay 18% uu ku yimid sicirka shidaalka), taasoo daba socota ifafaalaha caalamiga ah . ilaa bishii Janaayo 2011,qiimaha badeecooyinka laga soo dhoofiyo dibadda ee suuqyada laga isticmaalo shilin Soomaaliland waxay ahaayeen kuwa kala duwan , iyadoo qiimaha burka laga dareemay waxoogaa kor u kac ah (14 %), halka uu shidaalka ka ahaa (8 %) , saliid caddey (2%), heerka hoos u dhaca qiimaha bariiska guduudan ayaa ahaa (9%), halka qiimaha sonkortu uu ahaa mid sugan.

**Jaantus 6: Isbeddelada Tusaha Qiimaha Isticmaalaha ee heer Zoon**




Inkastoo helitaanka badeecooyinka daruuriga ah iyo kuwa aan daruuriga ahayn uu yahay mid caadi ah xilligan qaybaha dalka, haddana waxaa la filayaa in sare u kac ku yimaaddo xilliga mansuunka(Juun ilaa Septembar 2011) iyo xilliga *Ramadaanka* (Agoosto 2011). Kor u kaca heerka dhoofinta xoolaha nool ee la filayo marka la gaaro munaasabadaha Islaamka (*Ramadaanka iyo Xajka)* ayaa gacan ka geysan doona xoojinta awoooda dhaqaale ee ku aadan soo dejinta badeecooyinka maadaama xoolaha nool laga helayo lacag adag.

***Xaaladda nololeed ee qoysaska magaalada ee faqiirka ah (CPI)***

Jaantuska Qiimaha Isticmaalaha (CPI), oo ah mid lagu saleeyay xaddiga isticmaalka cunto ee ugu yar Sooomaaliya waa mid kor usii kacay dhamaan gobolada laga isticmaalo shilin Soomaaliga intii lagu jiray bishii May 2011 sababaha ugu muhiimsan ee ay maciishaddu la kacday waxaa ka mid ah kor u kaca ku yimid qiimaha masaggada guduudan- badeeco muhiim ah oo laga isticmaalo dalka iyo kor u kaca qiimaha badeecooyinka lasoo dejiyo sida saliid caddeyda, burka iyo sonkorta. Ilaa afartii bilood ee ugu horreysay sannadka 2011, sicirku aad ayuu sare ugu kacay gobolada Koofurta,Bartamaha iyo Waqooyi bari (14-24%), halka uu wax yar uun kor uga kacay dhanka Waqooyi galbeed (6%). Sare u kaca Jaantuska Qiimaha isticmaalaha ( CPI) ee dadka ku nool deegaanada laga isticmaalo shilin Soomaaliga waxaa keenay sare u kaca qiimaha masaggada guduudan iyadoo sannadkii 2008 ay dhibaato dhanka cuntada ahi jirtay awgeed ayuu qiimaha dalaggan gaaray heerkii ugu sareeyay. Ilaa bishii May 2010 waxaa aad sare ugu kacay Jaantuska Qiimaha (Gobolada Dhexe -36%, Waqooyi bari -26%, Koofurta -53 %). Sidaa si ka duwan, xaaladda qoysaska faqiirka ah ee deegaanada laga isticmaalo shilinka Soomaaliland ee waqooyi galbeed waa mid iska deggan maadaama qiimaha dalaggu uu yahay mid fiican kadib markii xilligii *Gu'ga-Karanta* ee 2010 uu dalaggu soo baxay(Muuqaalka 6).


nutrition

## NAFAQADA

**Mugadishu:**

Sida ku cad daraasado laga helay sahan laga sameeyay Muqdisho bishii april 2011 kaasoo ay si wadajir ah u sameeyeen hay'adaha FSNAU iyo ACF taasoo lagu sameeyay 902 carruur ah oo ay da'doodu u dhaxayso 6-59 bilood waxaa jira xaalad nafaqo-xumo daran (GAM), ( Qiyaasta WHZ <-2 ama ayoodima ) taasoo ah **qiyaas ahaan 15.2% (10.9-20.7)** iyo nafaqo-xumo aad u daran (SAM) ( qiyaasta WHZ <-3 ama ayoodima ) taasoo ah qiyaas ahaan **1.7% (0.9-3.1)**.

Heerka dhimashada ilmaha inta uu ku jiro sagaashanka maalmood ee ugu horreeya iyo heerka dhimashada ilmaha ka yar shan sano sida lagu soo warbixinta lagu helay waa **1.8**1 (1.38-2.37), iyo **2.2** (1.41-3.48), taasoo muujineysa kor ukac heerka dhimashada taasoo ay weheliso laba-jibbaarka heerka digniinta. Sida ay dadweynuhu ku muujiyeen jawaab-celin ay arrinta ka sameeyeen sababaha ugu muhiimsan ee dhimashadu waa kuwo ku yimaadda shil/dhaawac jirka, iyo shuban, sidoo kale xogta ku saabsan dhinaca nafaqada ee laga helayo xarumaha daryeelka caafimaadka ee deegaanada qaarkood waxay muujineysaa heer sare iyo mid deggan oo nafaqo xumo dhallaanka haysa (>20%). Sida ku cad Warbixintii ugu danbaysay ee Xogta Suuqa ee ay soo saartay hay'adda FSNAU bishii April 2011 qiimaha dalagyada la beerto aad ayey sare ugu kacday (26-35 %) marka la bar-bar dhigo bishii ka horreysay. Hase ahaatee qiimaha cuntooyinka daruuriga ah ee dibadda laga soo dhoofiyo bishii April waxay ahaayeen wuxuu ahaa mid halkiisii ku sugan. Maadaama qoysaska faqiirka ah noloshoodu ay inta badan ku tiirsan tahay cuntada gudaha kasoo baxda , sare-kaca ku yimaadda dalagyada gudaha waxay adkeyneysaa awoodda helitaanka, taasoo khatar uga dhigaysa xaalad nafaqo-xumo oo *Aad u daran* . macluumaad faahfaahsan oo ku saabsan daraasaddan bishii Maarso iyo April waxaa laga heli karaa www.fsnau.oreg



***Xero ay deggan yihiin dadka ku barakacay gudaha oo Hargeysa ku taal halkaasoo ilmaha lagu miisaamayo***
*FSNAU May 2011*

**Sahan –daraasadeed lagu sameeyey dadka ku bara-kacay gobolada waqooyi**

Bishii May ilaa Juun ee 2011 hay'adda FSNAU iyo kuwa ay bah-wadaagta ku yihiin shaqadu waxay ka fuliyeen sahan daraasadeed la xiriira xaaladda nafaqada xerooyinka ay ku nool yihiin dadka bara-kacay ee Somaliland iyo Puntland. Qiimeyntu weli way socotaa , laakiinse xogta billowga ah ee daraasadda laga sameeyay xeryaha bara-kacayaashu waxay muujineysaa natiijooyin kala duwan laga billaabo Deyrtii 2011(Oktoobar ilaa Diseembar):

• bara-kacayaasha ku nool Hargeysa : xaalada nafaq-xumo oo joogto ah oo joogto ah oo ay weheliso Xaalad Nafaqo-xumo oo daran (GAM) heerka 10.9% (8.1-14.5) iyo nafaqo-xumo aad u daran (SAM) heerka 2.2%(1.0-5.0)
. heerka dhimashada dhalaanka inta ay ku jiraan sagaashanka maalmood ee ugu horeeya noloshooda iyo xaddiga dhimashada ilmaha ka yar 5 sano waa 0.37(0.19-0.73) iyo 0.59(0.22-

Bara-kacayaasha Burco: waxaa jira xaalad nafaqo-xumo oo daran ( GAM ) taasoo heerkeedu gaarsiisan yahay19.3% (14.9-24.7) iyo xaalad nafaqo-xumo oo aad u daran (SAM) oo heerkeedu gaarsiisan yahay 5.7% (4.2-7.7) . heerka dhimashada dhalaanka inta ay ku jiraan sagaashanka maalmood ee ugu horeeya noloshooda Iyo heerka dhimashada ilmaha ka yar 5 sano oo ah 0.56 (0.30-0.91) iyo U5MR oo ah 2.02 (1.21-3.34), sida ay u qaabeysay hay'adda caafimaadka adduunka (WHO)arrintani waxay muujineysaa jiritaanka nafaqo-xumo oo daran taasoo ay weheliso dhimasho saa'id ah.

• bara-kacayaasha Berbera : waxaa ka jira xaalad nafaqo-xumo oo joogto iyadoo heerka nafaqo-xumada daran (GAM) ay tahay 14.5%, halka heerka nafaqo-xumada aadka u daran (SAM ) ay tahay 3.0%. heerka dhimashada dhalaanka inta ay ku jiraan sagaashanka maalmood ee ugu horeeya noloshooda iyo heerka dhimashada ilmaha ka yar 5 sano oo ah 0.28 (0.15-0.54) iyo U5MR oo ah 0.16 (0.03-0.88), sida ay ku warrameyso hay'adda WHO arrintani waa mid macquul ah. Sii adkaanta xaalada magaalada Burco waa mid ku timid shaqaalaha muruqmaalka ee bara-kacayaasha oo xilliyada qaar ku badan deegaanka..



*Mid ka mid ah ilmaha ku nool tuulada Qub-qub oo ku taal buuraleyda Sool, gobolka Bari oo lagu miisaamayo MUAC, FSANU May 2011*


Faah-faahin kooban oo ku saabsan daraasadda ayaa ku muujisan shaxda hoose. Faah-faahinta daraasadda waxaa lagu soo bandhigi doonaa cadadka bisha May-Juun ee Warbixinta Nafaqada taasoo lasoo daabici doono dhamaadka bishA Juun ee 2011.

| Dadweynaha la qiimeeyey | Nafaqo-darro xun | Nafaqo-darro aad u daran | Heerka dhimashada ilmaha anta ay ku jiraan 90 maalmood ee ugu horreeya | Heerka dhimashada ilmaha ka yar 5 sano | Qiimeynta xaaladda nafaqada |
|---|---|---|---|---|---|
| Magaalada Muqdisho | **15.2% (10.9-20.7)** | **1.7% (0.9-3.1)**..48) | **1.8**1 (1.38-2.37) | **2.2** (1.41-3.48), | Xaalad daran |
| Bara-kacayaasha Hargeysa | **10.9**%(8.1-14.5) | **2.2**%(1.0-5.0) | 0.37(0.19-0.73) | 0.59(0.22-1.55) | Xaalad aad u daran taasoo taagneyd ilaa deyrtii 2011 |
| Bara-kacayaasha Burco | **19.3**% (14.9-24.7) | 5.7%(4.2-7.7) | 0.56 (0.30-0.91) | 2.02(1.21-3.34) | Xaalad daran taasoo jirtay laga soo bilaabo Deyrtii Janaayo 2011 |
| Barakacayaasha Ber-bera ( mid liidata ) | 14.5% | 3.0% | 0.28 (0.15-0.54) | 0.16 (0.03-0.88) | Xaalad aad u daran ,taasoo sii xumaatay laga soo bilaabo Deyrtii 2011 |
| Barakacayaasha Garoowe | 26.8 (23.7-30.1) | 9.1 (6.8 – 12.1) | | | |

falanqeynta macluumaad dhameystiran oo bilow ah taasoo laga helay ilo kala duwan; nidaamka macluumaadka caafimaadka (HIS), cabbirka dhudhunka ilmaha sida ku cad qiimeynta nafaqada ama baaritaanka (screen), iyo macluumaad labaad oo ku saabsan qaababka ilmaha ay nafaqo-xumadu hayso loo keeno xarumaha barnaamijyada nafaqeynta ilmaha, intuba waxay muujinayaan inay ka jiraan Koofurta,Bartamaha iyo qaybo ka mid ah gobolka Bari xaalado joogto ah oo digniin wata. Arrintani waa mid waafaqsan qiyaasaha ay heshay hay'adda FSNAU ee ku saabsan xaaladda nafaqada ee bishii april 2011 (khariidada 3 ).

Hay'adda FSNAU iyo kuwa ay shaqada ku bahoobeen waxay qorsheynayaan inay sameeyaan 31 sahan oo la xiriira nafaqada kuwaasoo laga fulinayo dhamaan Soomaaliya bisha juun ilaa Luulyo, daraasad-sahameedyadani waxaa laga hirgelin doonaa deegaanada miyiga,deegaamada magaalooyinka ee Soomaaliland iyo Puntland, iyo dadka bara-kacayaasha ah eek u nool aagga Afgooye. Natiijada daraasad-sahameedkaas waxaa lagu soo daabici doonaa nuqulada danbe ee FSNAU.

**Khariidada 3 : Xaaladda qiimeynta nafaqada Soomaaliya April 2011**



# FALANQEYNTA BAAHSAN EE SUGNAANT CUNTADA


## DEEGAANADA MAGAALADA

deegaanada magaalada


Xaaladda sugnaanta cuntada ee daagaamada magaalooyinka aad ayey usii xumaanaysaa maadaama qiimaha lagu gato dalagyada daruuriga ee la beerto iyo badeecooyinka dibadda laga keenaba uu sare u sii kacayay sannnadkan gudihiisa. Arrimaha kale ee xaaladaha deegaanada magaalooyinka sii murgiyay waxay tahay hakadka ku yimid hawlihii ganacsiga iyo dhaqaalaha iyo barakaca dadweynaha ee ay sababeen dagaalada sokeeye ee daba dheeraaday ee kasii socda koofurta iyo gobolada dhexe (Muqdisho, Juba, Gedo, Bakool, Hiiraan iyo Bartamaha) (eeg qaybta ka hadleysa dagaallada sokeeye). Natiijadu waxay noqotay in sicirka maciishaddu uu kor uga kaco heerkii sannad ka hor boqolkiiba 35 khaastan deegaanada laga isticmaalo Shilin Soomaaliga (Koofurta ,Bartmaha iyo Waqooyiga), taasoo keentay inay hoos u dhacdo awoodda wax iibsi ee dadweynuhu. Arrimahan soo kordhay awgood ayaa waxaa lagama-maarmaan noqotay inay hay'adda FSANU mar kale dib u jaangooyso (bishii 6-aad 2011) tirada dadweynaha ay dhibaatadu saameysay taasoo gaartey 590,00 taasoo ka dhigan sare u kac 25 boqolkiiba marka loo eego tiradii hore oo ahayd 475,000 intii u dhaxysay bilihii 1-aad illaa iyo 6-aad ( eeg Taxanaha Farsamo No VI. 36 Qiimeynta Sugnaanta Cuntada iyo Nafaqada ee Xilliga Deyrta ka dib 2010/2011).

Qiimaha heerka ugu hooseeya ee kharash nololeeka ugu yar (CMB) ee dhamaan deegaanada laga isticmaalo Shilinka Soomaaliga waa mid weli kor usii socda maadaama ay kor u sii kacayaan qiimaha cuntada daruuriga ah, shidaalka iyo cuntooyinka kale ee dibadda laga soo dhoofiyo (eeg Jaantuska 7). Qiimaha ugu yar ee kharash (CMB) ayaa si aad ah sare ugu kacay tan iyo bishii 12-aad ee 2010 (14-21%) iyo 6-aad 2010 (26-51%) suuqyada ugu muhiimsan ee dhulka laga isticmaalo Shilin Soomaaliga, gaar ahaan gobollada koonfureed. Intii lagu jiray afartii bilood ee ugu horreysay ee sannadkan 2011 ayaa deegaamada Waqooyiga ee laga isticmaalo Shilinka Somaliland ,qiimaha lagu gato cuntada iyo qiimaha noloshuba aanay isbaddal la sheegi karo samayn iyadoo boqolkiiba 6 oo kaliya uu qiimuhu sare u kacay. Marka loo eego qiimaha dollarka, qiimaha ugu sarreeya ee kharash nololeedka ugu yar (CMB) ayaa weli waxa lagu arkayaa gobollada waqooyiga ee isticmaala Shilinka Somaalilaan iyo Shilinka Soomaaliga, taasoo u dhiganta $139-143; halka qiimaha ugu hooseeya oo ah $91 uu ka jiro gobollada Koonfurta. Farqiga weyn ee ka muuqda qiime nololeedka ugu yar ee gobolladamarka doollar lagu qiimeeyo da waa mid ka dhashay heerka awoodda iyo degganaanshaha sarrifka lacagaha ee deegaanada kala duwan iyo waliba heerka nolosha ee gobollada Waqooyiga oo ah mid sarreeya.

**Jaantus 7: Isbeddelada Qiimaha Karash-Nololeedka ugu Yar**




**Jaantus 8: Isbeddelada Qiimaha Firileyda Gobollada**




Haddii aynu milicsanno dhaqdhaqaaqa dakhli-maalmeedka muruq-maalka ama xoogsatada deegaamada iyo magaalooyinka kala duwan ee dalka ayaa ah kuwo kala duwan. Tusaale ahaan gobollada koonfurta isku celceliska qiimaha dakhalimaalmeedka ee deegaanada Jubba iyo dhulka laga beerto masaggada wuxuu hoos ugu dhacay waxoogaa ilaa **heer hoose** marka loo eego qiimihii uu ahaa bishii 12aad (7% Jubbooyinka iyo 10% aagga hodanka ku ah beerashada masaggada siday u kala horreeyaan) sidoo kale wuxuu hoos uga dhacay sidii uu ahaa bishii 6aad ee sannadkii hore (22% aagga Juba iyo 8% aagga hodanka ku ah beerashada masaggada siday u kala horeeyaan). Hase ahaatee, dhanka Shaabeelooyinka qiimaha dakhli maalmeedka muruqmaalku wuxuu kordhay 10-21 boqolkiiba laga soo billaabo bishii 12aad ee sannadkii hore waxaana sabab u ah shaqada muruqmaalka oo badatay billowga xilliga Gu'ga. Sidaasoo ay tahay weli heerka qiimaha ee dakhli maalmeedka muruqmaalku waxay weli ka hooseeyaan 17 boqolkiiba halkii uu taagnaa bishii 6aad ee sannadkii hore taasoo ay keentay shaqo helista oo korortay. Waxaa intaa dheer, in isbeddelada deegaanada Bartamaha uu ahaa mid xassillon ilaa bishii 12aad ee 2010, halka qiimaha hawl maalmeedka muruqmaalku uu bishii 6aad ee 2011 hoos ugu dhacay 12 boqolkiiba marka la bar-bar dhigo halkii uu taagnaa sannad ka hor. Deegaamada Waqooyiga ee laga isticmaalo shilin Soomaaliga ayaa qiimaha hawl maalmeedya wax isbaddal ahi uusan ku iman heerkii uu taagnaa 6 ilaa 12 bilood ka hor, hase ahaatee isla mudadaas gudaheeda deegaanada Waqooyiga ee laga isticmaalo Shilinka Somaliland wuxuu qiimuhu kor u kacay 10 ilaa 15 boqolkiiba taasoo ay sabab u tahay kor u kaca ku yimid hawlaha la xiriira soo saarka beeraha iyo dhoofinta xoolaha.

Iyadoo ay sare usii kacayso qiimaha noloshu, ayaa waxaa hoos usii dhacaya awooda wax iibsi ee dadka saboolka ku nool magaalooyinka taasoo yareynaysa awooddooda helid cunto. Tusaale ahaan, tan iyo bllowgii sannadkan 2011 isdhaafsiga ganacsiga ee dakhli maalmeedka muruqmaalka iyo dalagyada gudaha laga beerto aad ayuu hoos ugu dhacay dhamaan deegaanada laga isticmaalo Shilin Soomaaliga taasoo aad uga hooseysa halkii uu taagnaa muddo sannad ka hor ah (bishii 6aad 2010). Arrintan waxaa caddeyn u ah hoos u dhaca aan caadiga ahayn ee ku yimid isdhaafsiga dakhli maalmeedka muruqmaalka iyo dalagyada daruuriga ah (sida galleyda cad iyo masaggada cas) ee gobolada Koofureed tan iyo bishii 12aad 2010 (40-43%) bishii 6aad ee 2010 (60-62 %). Sidaa si la mid ah deegaanada Bartamaha waxaa laga dareemay hoos u dhac kan oo kale ah (bishii 12aad 2010- 20%) iyobishii 6aad 2010 50%) iyo deegaanda Waqooyiga laga isticmaalo shilin Soomaaliga (bishii 12aad 2010-20% iyo bishii 6aad 2010-43 %). Dhanka deegaanada Waqooyiga ee laga isticmaalo Shilinka Somalilaan is-dhaafsiga ganacsiga ee hawlmeeedka muruqmaalka iyo masaggada cad waxoogaa ayuu hoos ugu dhacay, 9 iyo 17 boqolkiiba siday u kala horreeyaan. Si guud ahaaneed, qiimaha ugu sarreeya ee isdhaafsiga ganacsiga oo ah 10i kiilo lagu baddalanayo shaqo maalmeed muruqmaal intii lagu jiray bishii 6aad 2011 waxaa laga diiwaan-geliyey deegaanada Waqooyi ee laga istcmaalo Shilinka Soomaalilaan, iyadoo is-dhaafsiga ganacsiga ee deegaanada laga isticmaalo Shilin Soomaaliga uu u dhexeeyo 3 ilaa 5 kiilo oo dalagyada la beerto ah halkii maalin ee shaqo ah (eeg jaantuska 8). Iyadoo ay halkeeda kasii socoto kor u kaca qiimaha cuntadu iyo dagaalada goos-gooska ah ee kasii socda Koofurta iyo Bartamaha, ayaa qiimaha nolol maalmeedka u muuqdaa uu ahaado mid deggan ama sare usii kaco gaar ahaan dadka ku nool magaalooyinka. Hay'adda FSNAU ayaa waxay haatan ku hawlan tahay daraasad sahan oo ballaaran ka socota magaalooyinka gobollada Waqooyiga iyo waliba qiimeyn degdeg ah oo lagu sameynayo deegaanada Koofurta iyo Bartamaha si loo ogaado tirada dadka ku dhibaataysan magaalooyinka ah ilaa laga gaarayo dhamaadka sannadka. Qiyaasaha dhamaystiran ayaa waxaa lasoo saari doonaa bisha 8aad ee 2011.

# DEEGAANADA MIYIGA

***Gobolada Waqooyi***

Xaaladda damaanadda noloshu waa mid macquul ah inta badan deegaanada miyiga ee waqooyi galbeed sababtoo ah roobabka Gu'ga oo si fiican u da'ay, waxaana meesha ka baxay ciriiirigii ka jiray dhanka biyaha isla mar ahaantaana kobcisay deegaanada xoola la daajiyo waana midda keentay in xaaladda xooluhu ay soo hagaagto. Deegaanada Waqooyi galbeed iyo Awdal waxsoosaarka iyo taranka xooluhuba waa mid ku dhow xaalad caadi ah kadib markii heer dhexe ah ay *Karantu* u da'day sannadkii 2010 intaa kadibna xilliga Gu'gu uu hadda sii heer dhexaad ah u da'ay. Laakiinse, buuraleyda Sool ee gobolka Sanaag iyo qaybo ka mid ah Nugaasha sare waxay u muuqdaan inay kusii jiri doonaan dhibaatada maxaa yeelay intii lagu jiray xilliga *Jiilaalka* waxay dadku waayeen tiro badan oo ka mid ah xoolahooda taasoo ay u dheer tahay daynta badan ee ka timid dhanka kharashka biyo-dhaaminta, iyo waliba safarada iyo kharashka dhanka cuntada ah ee la galay bilooyinkii abaarta.xaaladda ka jirta deegaanada xoolo-dhaqato/beeraleydu waxay ku xirnaan doontaa sida ay hadba u da'aan roobabka *Karantu* taasoo xaddidi doonta heerka waxsoosaarka *Gu'ga/Karanta* isla mar ahaantaana keeni doonta helitaanka dalagyada daruuriga ah ee laga beerto gobolka. Waqti-xaadirkan , waxay warbixinadu caddeynayaan in beerashada dalagyadu ay si heer caadi ah ku dhaw uga billaabatay gobolka Awdal.



Heer fiican oo muujinaya daaq iyo muuqaal neef ari ah oo wanaagsan. Hawdka gobolka Togdheerr. FSNAU, May 2011



Helitaanka biyaha deegaanka Buuraleyda Sool ee gobolka Sanaag. FSNAU, May 2011

Dhanka kale, deegaanada Waqooyi bari waxaa dib usoo fiicnaaday biyaha iyo daaqa sababtoo ah di'itaanka roobabka xilliga *Gu'ga* oo ah mid heer dhexe ah, taasoo keentay inay jirka xoolaha iyo iibkooduba dib usoo fiicnaadaan. Hase yeeshee waxaan ilaa iyo hadda soo fiicnaanayn waxsoosaarka iyo taranka idaha iyo riyaha waxaana sabab u ah xaaladda xoolaha oo ahayd mid liidata tan iyo xilligii *Deyrta* marka laga reebo geela. Sidaa awgeed, deegaanada hadda ay dhibaatadu ka jirto sidooda ayey sii ahaanayaan maadaama xaddiga xoolaha iyo tirada iibka u qalanta ay kooban yihiin taasoo salka ku haysa dhhimashada tiro badan oo xoolaha ka mid ah(dhimasho, iib-xumo) iyo waliba inayna dadku tahli kreynin muddada dhaw inay xoolo dib usoo gataan. Sidaa awgeed aad ayey u adag tahay inay dadka xoolo-dhaqatada ahi ee saboolka ahi wax faa'iido ahi kasoo gaarto sare u kaca ku iman doona xoolaha inta lagu jiro Ramadaanka iyo *Xajka* . intaa waxaa dheer, in sida suurtagalka ah haddii uu kor u kaco qiimaha lagu gato cuntada (bariiska) inta lagu jiro xilliga mansuunka taasoo ay weheliso hoos u dhaca dalagyada soo go'a deegaanada Koofurta inay saameyn aan wanaagsaneyn ku yeelan doonto heerka dhaqaalaha ee qoysaska saboolka ah

***Gobolada Dhexe (Galgaduud,Mudug ) iyo Hiiraan***

Waxay u eg tahay in gobolada Dhexe iyo Hiiraan ay dhibaatada kusii jirayaan inkastoo ilaha biyaha iyo dhulka daaqsinkuba ay waxoogaa soo fiicnaanayaan taasoo ay keentay xilli roobaadka xilli roobaadka dheeraaday oo waxoogaa taageero ah u keenay bulshooyinka xoolo-dhaqatada kadib markay la kulmeeen xilli jiilaal kulayl ah oo daba-dheeraaday. Kadib markii uusoo fiicnaaday helitaanka daaqa, tigaadda, , iyo xaaladaha biyuhu, waxaa dib uga soo saameyyntii abaarta idaha iyo riyaha, inkastoo lo'da iyo geelu ay u baahan doonaan muddo dheer si ay si fiican ugu soo kabtaan. Dhanka Hawdka iyo qaybo ka mid ah Cadduun daaqu maaha mid kaafi ah maxaa yeelay roobka Gu'ga oo ahaa mid heerka caadiga ah ka hooseeya, waxaa kaloo xusid mudan inay xaddidan tahay u safrinta xoolaha dhanka deegaanadan si ay u helaan daaqsin sababtoo ah caqabadaha dhanka qabiilka. Dhalitaanka idaha iyo ariga waxaa la filayaa inay noqdaan bisha Oktoobar 2011, inkastoo isla haddaba tiro yar oo geela ka mid ahi ay dhalmada bilaabeen bisha May haddana, waxaa la filayaa inay intooda badani dhalaan inta u dhaxeysa Juun ilaa Luulyo. Taa waxaa ka dhalanaya in saadaasha laga qabo heerka isticmaalka caanaha iyo gadashadooduba ay noqoto mid fiican muddada dhaw. Hadda helitaanka caanuhu



Soo kabashada jirka geela. Toore oo ka tirsan degmada Hobyo, gobolka Mudug, FSNAU, May 2011

waa mid ka hooseeya heerka caadiga ah sababtoo ah toro badan oo geel ah ayaa dhiciyey intii lagu jiray xilligii *Jiilaalka*. Waxaa kaloo jirta in muddadaii lagu jiray abaarta qallana ee daba-dheeraatay, qoysaska ku tiirsan xoolo-dhaqashadu ay qayb badan oo ka mid ah xoolahoodu ka dhinteen gaar ahaan deegaanada xeebta oo laga soo sheegayo inay ka jirto xaalada saboolnimo oo xoolo-dhaqatada ku dhacday. Inkastoo la filayo in qiimaha lagu kala gato xoolaha nool ay fiicnaadaan inta lagu jiro bisha *Ramadaan iyo xilliga Xajka ,* haddana qoysaska saboolka ahi wax badan kama faa'iidayaan arrinta maadaama hantida ay leeyihiin ee xoolaha nooli ay xaddidan tahay. Deegaanada xoolo-dhaqato/beeraleyda ah, xaaladdu waxay u eg tahay inay soo hagaagto gaar ahaan aagga hodanka ku ah beerashada digirta maadaama la filayo in si heer dhex-dhexaad ah ay dalagyadu usoo baxaan.

Sidaa si ka duwan deegaanada gobolka Hiiraan waxaa ka billowday gooshada dalag-beereedka taasoo ah mid hooseysa. Labada deegaanba xaaladda lo'du waa mid liidata lagamana filayo waxsoosaar iyo dhalmo midna ilaa laga gaaro dhamaadka sannadka. Dhanka koofurta qiimaha dalagyadu waxay ahaanayaan kuwo weli qaali ah bilaha soo socda, taasoo daciifineysa awoodda wax gadasho ee dadka maadaama la filayo waxsoosaarka dalagyada kusoo baxa Gu'ga inay hoos u dhacaan,.

***Gobolada Koofureed***



*Bilaabitaanka beerashada masaggada oo ah mid hooseeya,kamsuuma,Jamaame Jubbada Hoose, FSNAU, May 2011*

Xaaladda cuntada ee gobolada koofureed waa mid sii xumaaneysa maadaama markii labaad ay hoos u dhacday xaddiga dalagyada beeraha kasoo go'aya kadib markii di'itaanka roobku uu hoos u dhacay*(Deyrtii 20'*10 iyo *Gu* ga 2011). Inkastoo di'itaanka roobka *Gu'gu uu waxoogaa fududeeyay* cadaadiskii haystay bulshooyinka xoolo-dhaqatada iyo kuwa xoolo-dhaqato/beeraleyda ah, haddana wanaagsanaanta uu roobku keenay lama dareemi doono muddada dhow maadaama tiro badan oo xoolo ahi ay dhinteen isla mar ahaantaana xaaladda jireed ee xooluhu ay aad u xumaatay intii lagu jirey bilihii *Jiilaalka* kulul ee qallalan ee gobolka ka dhacay. Natiijadu waxay noqoneysaa hoos u dhac ku yimaadda waxsoosaarka caanaha oo hoos u dhaca oo salka ku haysa yaraanshaha dhalitaanka iyo rimitaanka xoolaha iyo hoos u dhaca dakhliga laga helo iibka xoolaha maadaama deegaamada ay ku dhaqan yihiin bulshooyinka nolo ahaan ku tiirsan xoolo-dhaqatada iyo kuwa xoolodhaqato/beeraleyda ah intooda badan aan laga helaynin xoolo iibka ku fiican.sidoo kale ilaha dakhliga iyo cuntada ee dadka ku nool deegaanada webiyada iyo kuwa xoolo-dhaqato/beeraleyda noloshooda waxaa saameyn doona hoos u dhaca la filayo inuu ku yimaaddo dalagyada kusoo go'a Gu'ga oo noqon doona kuwo heerkii caadiga ahaa ka hooseeya iyo la'aanta wax keyd ah oo dib loo dhigto .gobolada arrintan dhibaatada ugu badan kala kulmaya waxaa ka mid ah Jubbada Hoose (Saakow/Salaagle), Shabeelada Hoose iyo inta badan gobolada hodanka ku ah beerashada masaggada( gobolada Gedo, Bakool and Hiiraan). Arrinta ugu badan ee sababeysa saadaasha ah hoos u dhaca ku imanaya dalagyada kusoo go'aya xilliga *Gu'ga* waxaa ka mid ah dib u dhaca ku yimid hawlaha la xiriira beerashada (abuuritaanka, harameynta iyo waraabinta) oo ay keentay hoos u dhaca heerka roobka ee xilli roobaadka, iyo weliba awoodda falashada qadiimka ah ee beeraha iyo isticmaalka qalabka beerashada oo ah mid hooseysa oo ay sabab u tahay sare u kaca qiimaha shidaalka iyo yaraanta helitaanka miraha abuurka dalagyada kadib markii dalag-soosaarku uu hoos u dhacay *Deyrtii* ugu danbeysay *r* 2010/11. gobolka Baay oo ah meel ay aad uga baxdo masaggadu ayaa u muuqda mid saadaasha masaggadu ay fiican tahay inkastoo ay ka hooseyn doonto heerkii markii hore caadi ahaan uu ahaan jiray.

Deegaanada Jubba iyo Shabeelooyinka waxaa la filayaa in helitaanka dalagyada daruuriga ahi ay noqdaan heer fiican waase haddii roobka *Xagaayada ee la filayo* (Juun ilaa billowga Agosto ) ay noqdaan heer dhexaad taasoo fursad beer-falasho siinaysa deegaanada ay beerashada dalagyadu ka baaqdeen (Septembar ilaa Oktoobar 2011). Guud ahaan, saadaasha waqti xaadirka ee wax-soosaarka dalagyada Gu'gu waxay tilmaameysaa inay weli sii socon doonto helitaan-yarida dalagyada gudaha kasoo baxa taasoo kor u qaadeysa qiimaha dalagyada daruuriga ah, isla mar ahaantaana yareyneysa awoodda wax-gadashada ee bulshooyinka saboolka hoose iyo heerka dhexe ee miyiga iyo kuwa magaalada, sidoo kale waxay xaddideysaa taageerada bulshada , waxaa kale oo hoos u dhacaya fursadaha shaqada maadaama ay nabaddu tahay mid aan caga adag ku taagneyn, iyo weliba gargaarka bani'aadminimo ee gobolka oo xaddidnaanaya.

**Cadadyo dhawaan la daabacay iyo kuwo lasoo daabici doono**

*FSNAU War-Saxaafadeed , Juun 2011*
*FSNAU/FEWSNET Macluumaadkii ugu danbeeyey ee la xiriira Cimilada , May 2011*
*FSNAU/FEWSNET Macluumaadkii ugu Danbeeyay ee arrimaha Suuqa , May 2011*
*Warbixintii ugu danbeysay ee la xiriirta Nafaqadae, May- Juun 2011*
*FSNAU Taxanaha Warbixinta dhanka Farsamada ee la xiriirta Xaaladda Nafaqada, Febraayo2011*
*FSNAU Taxanaha Warbixinta Farsamada ee xilliga Deyrta dabadeed, '10/11 Falanqeyn, Maarso2011*

*FIIRO GAAR AH: nuqulada daabacaadda ee kor ku xusaan waxaa laga heli karaa websaytka hay'adda FSNAU oo ah: www.fsnau.org*

Technical and Managerial Support

Funding Agencies